



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Noofambar 29, 2021

Ku socota: Waalidiinta carruurta yar yar ee qabta I/DD iyo kooxaha wax u dooda

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Kulanka dhanka internet-ka ee Waalidiinta ah Daryeel bixiyayaasha Lacagta qaata

Iyada oo uu sabab u yahay cudurka baahsan ee COVID-19, Xarunta Adeegyada Medicaid iyo Medicare (CMS) ayaa Oregon siisay “oggolanasho degdega” si ay ugu oggolaato waalidiinta/mas’uuliyiinta carruurta qabta naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) in ay noqdaan Shaqaalaha Daryeelka Guriga iyo Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah oo lacag qaata oo loogu talagalay ilmahooda.

Marka cudurka baahsan iyo ku dhawaaqista xaalada caafimaad ee degdega ah ee bulshada ee federaalka ee hadda jirtaa dhammaato, waxaan filaynaa in CMS ay soo afjarto iska reebitaankan ku meel gaarka ah.

Tan iyo markii oggolaanshuhu uu dhaqan galay Janaayo 2021, ODDS waxay dhageysatay walwalkaagii yo su’aalahaagii ku saabsanaa sababta xaaladan degdega ahi waqtigeedu uga dhici doono Oregon. Waxaanu jeclaan lahayn in aanu kugu marti qaadno kulanka dhanka internet-ka halkaasi oo aanu sharraxaad ka bixin doono xeerarka federaalka ugana jawaabi doono su’aalahaaga. Halkan waxaa ku qoran faahfaahinta:

- **Webinar-ka:** “Parents as Paid Caregivers”
- **Taariikhda:** Diisambar 10, 2021

- **Wakhtiga:** 1:30–2:30 galabnimo
- **Goobta:** Internet-ka
- **Meesha laga sii gelayo kulanka:** <https://bit.ly/31fEz7e>

Fadlan isticmaal meesha la sii gelayo 'link' si aad ugu soo biirto kulanka dhanka internet-ka ah 'webinar' oo dhacaya Diisambar 10.

Su'aalaha ku saabsan helitaanka, ama codsiga in wax la sii qorsheeyo, fadlan Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811 ama [DD.DirectorsOffice@dhs.oregon.gov](mailto:DD.DirectorsOffice@dhs.oregon.gov). Codsiyada waa in lagu sameeyaa ugu yaraan saddex maalmo shaqo ka hor kulanka. Turjumaada Luqadda Dadka aan wax Maqli karin ee Maraykanka iyo Helitaanka Wada xiriir Waqti-Dhab ah (CART) oo hadalka qoraal ah 'captioning' ayaa la bixin doonaa.

Waad ku mahadsan tahay dhammaan wixii aad qabatay ee daryeelka carruurtaada intii lagu jiray waqtiyadan adag. Waxaan rajeynaynaa in aanu kula kulano.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon

kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).